


LEEP (Loop Electrosurgical Excision Procedure)

If your pap test was abnormal, you may need LEEP as a treatment. LEEP is done to remove tissue from the cervix.

Arrive on time for your treatment. It takes about 15-20 minutes. Plan on being here at least 1 hour.




LEEP

(Habka Qalliinka Korontada ee Nudaha Birta godan lagu soo jarayo [Loop Electrosurgical Excision Procedure])

Haddii baaritaankaaga pap-ku uusan caadi noqon, waxaa laga yaabaa in aad u baahato LEEP in lagugu daaweeyo. LEEP waxaa loo sameeyaa in unugyo looga soo saaro afka ilmo galeenka.

Waqtiga ku imow baaritaankaaga. Wuxuu qaadanayaa ilaa 15-20 daqiiqadood. Soo qorsheyso in aad halkaan joogeysid ugu yaraan 1 saac.



Your Treatment

- Your feet will be placed in stirrups. The doctor will use an instrument called a speculum that will be put into your vagina to keep it open. You may feel some pressure.
- Medicine is used to numb your cervix.
- A solution is put on your cervix to show abnormal cells.
- A magnifying instrument is used to get a close up view of your cervix.
- A fine wire loop is used to remove the abnormal tissue.
- The tissue will be sent to a lab for testing.

Your Care After Treatment

Your cervix should heal completely in a few weeks.

- Rest for the next 2 days.
- You may have some mild cramping.
- You may have some vaginal discharge for about 2 weeks. This is like having a period.

Do not use tampons, have sexual intercourse or douche for 4 weeks. This reduces your risk of bleeding and allows healing to occur.

Call your doctor **right away** if you have:

- Bleeding that soaks a pad in 1 hour
- Severe abdominal cramps or pain
- Chills or fever of 100.5 degrees F or 38 degrees C
- Vaginal discharge that has a foul odor
- Pain not controlled by over the counter pain medicine. Do not take aspirin.

Talk to your doctor or nurse if you have any questions or concerns.

Daaweyntaada

- Cagta waxaa lagu saari doonaa bir meel ka soo lulata. Takhtarku wuxuu isticmaali doonaa qalab la yiraahdo speculum kaasoo siilka laga gelin doono si loo kala furo. Waxaa laga yaabaa in aad xoogaa cadaadis ah dareento.
- Daawo ayaa loo isticmaali doonaa in ay afka ilmo galeenkaaga kaabuubiso.
- Milan ayaa ilmo galeenka lagaaga shubi doonaa si loo muujiyo nudaha aan caadiga ahayn.
- Qalab wax weyneeya ayaa loo isticmaalayaa si loo helo aragti dhow ee ilmo galeenkaaga.
- Silig yar oo soo godan ayaa loo isticmaalayaa in lagu soo saaro nudda aan caadiga ahayn.
- Nudda waxaa loo diri doonaa shaybaar baara.

Daryeelkaaga Daaweynta ka Dib

Afka ilmo galeenkaagu waa in uu ku daawoobaa dhowr toddobaad.

- Naso 2-da maalmood ee ku xiga.
- Waxaa laga yaabaa in aad isku aragto casiraad yar.
- Waxaa laga yaabaa in dheecaan uu siilka ka yimaado ilaa 2 toddobaad. Tani waxay la mid tahay sidii adigoo caado qaba.

Ha isticmaalin suufka caadada loo gashto, galmo ha sameynin ama saliingaha siilka wax la isaga mariyo. Tani waxay kaa yaraynaysaa halista dhiig baxa waxayna oggolaanaysaa in ay meeshu bogsato.

Isla markiiba takhtarkaaga wac haddii aad:

- Dhiig cadka suufka ah ku qoynaya 1 saac
- Casiraad ama xanuun daran ee uur ku jirta
- Qar-qaryo ama qandho 100.5 darajo oo F aha ama 38 darajo oo C ah
- Dheecaan siilka ka yimaada oo si xun u uraya
- Xanuun aysan kaa joojineynin daawada xanuunka ee la iska soo gato. Asbiriin ha qaadannin.

La hadal takhtarkaaga ama kalkaalisada haddii aad wax su'aalo ama walaac ah qabtid.

2/2006. Developed through a partnership of The Ohio State University Medical Center, Mount Carmel Health and OhioHealth, Columbus, Ohio. Available for use as a public service without copyright restrictions at www.healthinfotranslations.com.

LEEP. Somali